



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Oktoobar 28, 2022

Ku socota: Xubnaha bulshada I/DD, hawl wadaagayaasha Qabiilka iyo shaqaalaha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Barnaamijka Isku xirka La awoodi karo

Ma aha in qof kastaa haysto lacag ku filan oo ku bixiyo internet-ka. Barnaamijka Isku xirka La awoodi karo (ACP) wuxuu dadka ka caawiyaa in ay bixiyaan lacagta internet-ka. In ka badan 500,000 oo ah dadka reer Oregon ayaa weli u qalma in ay isku diiwaan geliyaan.

Haddii adiga ama qoyskaagu uu helo adeegyada ODDS, waxaa dhici karta in aad u qalanto.

Haddii aad tahay hawl-wadaagaha ODDS, fadlan dhiirigeli barnaamijka oo dadka ka caawi in ay codsadaan.

Cidmaa u qalanta?

Si aad ugu qalanto, waa in aad:

1. Sameysaa lacag gaaraysa boqolkiiba 200% ee Qiyaasta Heerka Saboolnimada ee Federaalka u dhigan, ama
2. Qoyskaagu waa in uu helaa mid ka mid ah kuwa soo socda:
 - Qadada Dugsiga oo Lacag la'aan ah oo Qiimaheeda Hoos loo dhigay ama Barnaamijka Quraacda
 - Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
 - Medicaid
 - Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI)
 - Barnaamijka Nafaqada dheeraadka ah ee loogu talagalay Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)

- Taageerada Guryaha Dadweynaha ee Federaalka
- Barnaamijyada taageerada Qabiilka qaarkood sida Tribal TANF iyo Tribal Head Start

Faa'iidooyinka barnaamijka

- Ilaa boqolkiiba \$30 bishii oo laga dhimayo biilasha internet-ka ee guriga
- Ilaa boqolkiiba \$75 bishii oo loogu talagalay qoysaska ku nool dhulka Qabiilka
- Lacag dhan \$100 oo laga dhimayo gadashada laptop-ka, tablet-ka ama kambiyuutarka desktop-ka

Sida loo codsado

Ka codso www.getinternet.gov ama ka wac 877-384-2575.

- Hubi in loo qalmo, isqor oo ogow in bixiyayaasha internet-ku bixiyaan qorshayaal si buuxda loo daboolayo.
- Website-ku waa mid u wanaagsan telefoonka gacanta oo la heli karo isaga oo ah Ingiriisi iyo Isbaanish.

Ilaha loogu talagalay hawl-wadaagayaasha

Fadlan sawirradani waaweyn la wadaag xafiiskaaga iyo macaamiisha.

- Sawirka 1: [Ingiriisi](#) | [Isbaanish](#) | [Qabiilka](#)
- Sawirka 2: [Ingiriisi](#) | [Isbaanish](#) | [Qabiilka](#)

Caawimaad

- [Su'aalaha Inta Badan La Iska weydiiyo](#)
- Xarunta Taageerada ACP: 877-384-2575.

Waad ku mahadsan tahay in aad dadka reer Oregon ka caawiso in ay helaan internet.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena .

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.